

# Laba todobaad ayaa uga harsan dadka degan Vermont iney Codsadaan Gargaar Federaal

Release Date: Nofeembar 10, 2024

Dadka degan Vermont oo ay saameysey duufaanaadii, daadkii, dhul-simbirixii, iyo dhooqo-guurkii darnaan ee Luulyo waxey haystaan laba todobaad oo ay ku codsadaan gargaar musiibo ee federaal, taas oo ay ku jiri karto deeqaha FEMA ee lagu dayactiro guriyaha laguna bedelo guriyaha ama deymo ribacoodu hooseeyo ee laga helo Maamulka Ganacsiyad Yar ee Mareykanka. **Taariikhda kama dambeysta ee la codsado waa Nofeembar 25, 2024.**

Wixii quseeya duufaanaadii dhacay **Luulyo 9-11**, dadka degan gobolada la cayimay ee **Addison, Caledonia, Chittenden, Essex, Lamoille, Orleans iyo Washington** waxey u qalmaan iney codsadaan. Quseysa duufanaddi **Luulyo 29-31**, kuwa degan gobolada la cayimay ee **Caledonia, Essex iyo Orleans** ayaa codsan kara.

Dadka degan Vermont oo ay saameysey *labada* duufaano ee Luulyo waa iney u gudibiyaan **codsiyo kala ah** dhacdo kasta.

Dadka badbaaday oo qaba qasaaro ama waxyeelo waa iney FEMA ka codsadaan xitaa haddii aysan wali haysan qiyaasaha dayactirka ama xalinta caymiska. Si loogu tixgeliyo, dadka jooga goobaha saamooway ayaa u baahan iney iska diiwaan geliyaan FEMA si ay u bilaabaan nidaamka. FEMA ayaa kala shaqeyn doonta dadka badbaaday si ay u aqoonsadaan xogta loo baahanyahay si loo go'aamiyo u-qalmitaanka.

Kuwa jeclaan lahaa iney waji-ka-waji ula hadlaan takhasusyahan ka soo-kabasho musiibo, laba **Xarumo Kasoo-kabasho Musiibo** ayaa ka furan Vermont. Xarumahan waxey ku yaaliin **Hinesburg Town Hall** (10632 Route 116) iyo **Lyndon Public Safety Facility** ee 366 Main Street. Saacadaha waa 9 a.m ilaa 6 p.m. Isniin - Sabti. Axadaha wuu Xiranyahay.



FEMA

Page 1 of 2

Dadka degan uma baahna iney booqdaan DRC si ay u codsadaan gargaar FEMA ah. Kuwaani waa saddex qaabab ee loo codsado:

- Aad onleenka [DisasterAssistance.gov](https://DisasterAssistance.gov).
- Ka wac FEMA Leenka-Caawinta ee **1-800-621-3362**. Khadadka taleefonka ayaa shaqeeya laga bilaabo 7 a.m. ilaa 10 p.m. (wakhtiga aagaaga), todobo maalmood asbuucii. Gargaar ayaa diyaar ku ah inta badan luuqadaha. Haddii aad isticmaashid adeega isku-duwida, adeeg taleefon ee qoraal leh ama waxkale, usii FEMA taleefonkaaga adeegaas. Muuqaal gelitaan ee sida loo codsado gargaar ah aad [youtube.com/watch?v= WZGpWI2RCNw..](https://youtube.com/watch?v=WZGpWI2RCNw..)
- Lasoo dag [Apka Moobeelka ee FEMA](#)

Si aad u codsato SBA:

- Ka codso onleen oona ka hel macluumaadka gargaar musiibo ee dheeriga ah [sba.gov/disaster](https://sba.gov/disaster)
- Ka wac Xarunta Adeega Macmiilka SBA ee (800) 659-2955 laga bilaabo 8:00 a.m. – 8:00 p.m. ET Isniin ilaa Jimco ama u dir iimeyl [disastercustomerservice@sba.gov](mailto:disastercustomerservice@sba.gov) wixii macluumaad dheeri ah.
- Dadka ah dhagoole, ku adag maqal, ama leh naafanimu hadalka ah, fadlan garaac 7-1-1 si aad marin ugu heshid adeegyada isku-duwida isgaarsiineed.

Markay ahayd Oktoobar 15, 2024, waxaa lagu dhawaaqay in kharashyada loogu talagalay Barnaamijka Deynta Musiibo ee SBA si buuxda loogu tasarufay. Inkastoo deymo cusub ee Musiibo ee SBA ah aan la bixin karin ilaa Kongareeska ka meel-mariyo qarash-garayn dheeri ah, SBA waxaa ka go'naan doonta iney taageerto ka-badbaadiyeyaasha musiibo. Codsiyada ayaa sii wadi doona in la aqbalo lagana shaqeeyo si loo xaqiijiyo in shakhsiyaaska iyo ganaciyaduba ugu diyaar ahaadaan iney helaan gargaar marka ay qarash-garaynta diyaar noqoto.



**FEMA**

Page 2 of 2